# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA, GUDIYADA IYO GOLAWAYNAHA

**Kal-fadhigii 37$^{aad}$ fadhigii 23$^{aad}$ iyo 24aad**

**25/26/08/2018**

**Quraanka: -** Md. Maxamuud axmed Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga: -**

- Doodda Xeerka Ciidanka ilaalada Xeebaha Somaliland

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaynu u Doodda Xeerka Ciidanka ilaalada Xeebaha Somaliland markaa xoghayntu Xildhibaanada doodda doonaya in ka qayb qaataan ha soo qoreen.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid: -** Marka hore waxaan ka bilaabay qeexida aagaga ay baddu kala leedahay eray bixin wanaagsan, isla markaana helno qeexid wanaagsana oo badda caalmiga ahi leedahay. Markaa ilaa afar shan eray bixinood oo qaybaha badda ah Ayaan isku dayey inaan qeexo.

**Biyo-gudood (Internal water): -** Waxa loola jeedaa aagga badda ee Somaliland madax bannaani buuxda (Sovereign rights) u leedahay ee Markab ganacsi oo shisheeye aanu ku soo geli Karin oggolaansho la'aan, dembiga ka dhacana loo qaadanayo dembi ka dhacay dhulka Somaliland. Aaggan waxa ka mid ah dekeddaha iyo dugaaladda leh Marin ku xidhiidhiya biyo-dhuleedka, marinkaas oo aanu ballaciisu ka badnayn 24 mayl badeed.

**Biyo-gudood (territorial water): -** Waa aag badeed, marka laga cabbiro xarriiqa caariga ugu hooseey, ay fogaantiisu tahay 12 mayl badeed, waana aag uu Qaranka Somaliland u leedahay madax-bannaani buuxda, dembiga ka dhacana loo qaadanayo dembi ka dhacay Somaliland, laakiin maraakiibta ganacsi ee shisheeye ku soo geli karaan oggolaansho la'aan iyagoo adeegsanaya xaqa ka gudbidda nadiifta (erasing passage) ee ay shardiga u tahay in ay maraakiibtiisi aagga kaga gudbaan si dhakhso ah hakasho la'aan.

**Aagga raacsanaha (Contiguous Zone)**: - Waxa aagga 12 mayl badeed ah ee u xiga biyo-dhuleedka, waxaanu ka mid yahay biyaha caalamiga ah iyo aag-dhaqaaleedka gaarka ah ee Somaliland waxase Somaliland awood sharci ugu leedahay afarta arrimood ee kala ah Cashuuraha (Taxation), kastammada (Customs) socdaalka (immigration) iyo wasakhowga (pollution).

**Aagga dhaqaaleedka gaarka ah (Exclusive Economic Zone): - Waa** aag fogaantiisu gaadho 200 Mayl badeed, haddii aanu jirin dal kale oo 400 Mayl wax ka yar dhinaca kale badda kaga yaal, oo markaa ay tahay in badda u dhexaysaa labada dal midkiiba nus ahaan u yeesho aag-dhaqaaleedka gaarka ah. Dal waliba aag-dhaqaaleedka gaarka ah wuxuu ku leeyahay khayraadka ku jira (Noole, Macdan shidaal iwm.

Aaggan dembiga ka dhacana markabdushii waxa awood dawladda markabku kuu diiwaangashan yahay ka weel badeed lagu **g**alena waxa awood u leh dawladda qabata (Universal Jurisdiction).

**Qaarad ku-nabane (Continental Shelf):-** Waa qayb ka mid ah dhulka qaaradda soo si jan-jeedh ah badda u hoos maray oo lagu sheego inuu dhul muuqda ahaa xiliyada barafka (glacial period) waxaanu ku egyahay halkuu jan-jeedhku ka noqdo garbo hoos u go'aan oo wixii ka shisheeya gunta baddu ka noqoto mid aad u dheer ( deep Ocean bed) qaarad ku-nabanuhu waxaa qayb ka mid ah dhulka uu yaallo ee qaaradda waxaana sharci ahaan leh dalka uu dhulka-qaaradeedkeeda ku yaallo, waxaanu meela qaar gaadha ilaa 310 mayl badeed.

**Biyaha Caalamiga: - Waa** biyo-badeedka ka baxsan biyo-dhuleedka ee uu ka jirayo xaqa bad-mushaaxidda badda ee xorta ah (Free Navigation) oo ah mabda'a guud ahaan ka shaqeeya biyaha-caalamiga, oo ka reebban tahay uun xaaladaha gaarka ah ee la adeegsan karo aragtida eryashada diirran (Doctorine of hot pursuit) Markay shuruudaheedu sugmaan loona adeegsanay sida uu tilmaamayo qodobka 110 ee heshiiska Caalamiga ah ee Xeerka Badda 1982.

**Qaybta 1aad: Qodobo hordhac ah**

**Wuxuu u dhignaa sidan:** Qodobka 1[aad]: Xeerkan waxa lagu magacaabi doonaa Xeerka Ciidanka Ilaalinta Xeebaha Somaliland, Xeer Lr. XXX/2017

**Waxaan u beddelay sidan:** Qodobka 1[aad]: Xeerkan waxa lagu magacaabayaa Xeerka Ciidanka Ilaalinta Xeebaha Somaliland, Xeer Lr. XXX/2017

**Qaybta 1[aad]: Eray Bixin** Wuxuu u dhignaa sidan: **"Ciidanka Ilaalada Xeebaha"** Waxa loola jeedaa, Ciidanka sharci fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeerbaha.

**Waxaan u beddelay sidan: "Ciidanka Ilaalada Xeebaha"** Waxa loola jeedaa, Ciidanka Ilaalada Xeerbaha Jamhuuriyadda Somaliland.

**Wuxuu u dhignaa sidan: Xad badeed: "Xad badeed"** waxa loola jeedaa xaduudaha biyaha badda ee (12) mile badeed, aagga ku xiga xad badeedka (contiguous zone) iyo aagga khayraadka badda Soamliland (EEZ).

**Waxa loo beddelay sidan: "Xad badeed"** waxa loola jeedaa xaduudaha badda ee Somaliland la leedahay dalka ay dhinaca badda kale jaar la tahay iyo biyo-dhuleedka

(continental zone) waxa loola jeedaa fogaanta dhinaca badda ee 12 Mile badeed ee Qaranka Somaliland Madax-bannaani buuxda u leeyahay.

**Qaybta 3aad: Ujeeddada Xeerka:** Kalmada **"nidaam ciidan"** Waxa lagu beddelay **"Ciidan Nidaamsan"**

**Qodobka 4aad. Baaxada Xeerka** ***Farqada 1aad waxay u dhignayd sidan:***

1. Xeerkan waxa lagu dabaqayaa danbiyadda kala duwan ee ka dhaca xuduud biyoodka(bada) Somaliland.

**Qodobka 4aad. Baaxada Xeerka** ***Farqada 1aad waxa loo beddelay sidan:***

1. Xeerkan waxa lagu dabbaqayaa qabashada iyo baadhista dembiyadda kala duwan ee ka dhaca gudaha xad badeedka Somaliland.

**Qodobka 5aad wuxuu u dhignaa sidan:** Aasaasidda Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Xeerka waxa lagu aasaasey Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaaliland
2. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa ay xilkooda iyo waajibaadyadooda u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka Soomaaliland iyo shuruucda kale ee khuseeya hawlahooda

**Qodobka 5aad waxa loo beddelay sidan:** Aasaasidda Ciidanka Ilaalada Xeebaha

3. Xeerka waxa lagu aasaasey Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland
4. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu wuxuu xilkooda iyo waajibaadkiisa u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka Somaliland xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka intii hawshiisu khuseeya.

**Qodobka 7aad wuxuu u dhignaa sidan:** Astaanta Ciidanka Ilaaladda Xeebaha

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland waxa uu yeelanayaa astaan u gaar ah;
2. Astaanta Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa qoraal wareegsan oo uu ku dhexyaal:

   b. Galaydh badeed,

   t. baroosin ay ku xardhantahay laba faras badeed oo dhinacyada ka kala haysta kuna dhex qorantahay ciidanka ilaalada xeebuhu

   j. laba caleemood oo dhinacyada kaga xardhan oo midabkooda guud hurud yahay.

x. Astaanta Ciidanka Ilaalada Xeebaha JSL cidii isticmaasha iyo ogolaansho ka haysan talaiska ciidanka Ilaalada Xeebaha waxay mutaysanaysaa ciqaab ganaax ah.

**Qodobka 7aad waxa loo beddelay sidan:** Astaanta Ciidanka Ilaaladda Xeebaha

Kh. Ciidanka Ilaalada Xeebaha Somaliland waxa uu yeelanayaa astaan u gaar ah;

d. Astaanta Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa qoraal wareegsan oo uu ku dhexyaal:
r. Galaydh badeed,
s. baroosin ay ku xardhantahay laba faras badeed oo dhinacyada ka kala haysta kuna dhex qorantahay "Ciidanka ilaalada xeebuhu"

Sh. laba caleemood oo dhinacyada kaga xardhan oo midabkooda guud hurud yahay.

Dh. Astaanta Ciidanka Ilaalada Xeebbaha JSL ciddii isticmaasha ee aan ahayn taliska ciidanka Ilaalada Xeebaha waxay mutaysanaysaa ciqaab ganaax ah.

**Qodobka 8aad wuxuu u dhignaa sidan:**– Xarrunta taliska iyo xarun goboleedyo

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa Xarun talis iyo Xarumo Goboleedyo .
2. Ciidanka Ilaalada xeebuhu waa in uu aasaaso oo yeesho xarun taliska guud goboleedyo iyo baro ilaalo oo ku baahsan Xeebaha Soomaliland si uu u sugo ammaanka dadka, hantida iyo fayo dhawrka badda.
3. Dhismaha Xarunta taliska iyo Xarun goboleedyada iyo nidaamkooda maamul waxa qeexi doona xeer hoosaad gaar ah.

**Qodobka 8aad waxa loo beddelay sidan:**– Xarunta taliska iyo xarun goboleedyo

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa Xarun talis iyo Xarumo Goboleedyo .
2. Ciidanka Ilaalada xeebuhu waa in uu aasaaso oo yeesho xarun taliska guud goboleedyo iyo baro ilaalo oo ku baahsan Xeebaha Soomaliland si uu u sugo ammaanka dadka, hantida iyo fayo dhawrka badda.

3. Dhismaha Xarunta taliska, xarun goboleedyada, baraha ilaalada iyo nidaamkooda maamul waxa lagu qeexayaa xeer nidaamiye ka dheegan xeeran.

**Qodobka 9aad wuxuu u dhignaa sidan:**– Xadka Awoodda fulineed

1. Awoodaha fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxay ay ku koobantahay gudaha xad baddeedka Soomaliland.
2. Awoodaha sharci fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland waxa kale oo lagu fulin karaa gaadiidka badda goobta uu doono ha joogo e sita calanka Soomaliland si waafaqsan sida ku cad Qodobka 4aad ee Xeerka Ciqaabta Guud;

**Qodobka 9aad waxa loo beddelay sidan:** – Xadka Awoodda fulineed

3. Awoodaha fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxay ku egtahay gudaha aag-dhaqaaleedka haddii aanay xaalada eryasho diirran (Hot pursuit) oo weel-badeedka la eryanayaa ula galay biyo-dhuleedka dal kale.
**4.** Awoodaha sharci fulineed ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland waxa kale oo lagu fulin karaa weel-badeed kasta oo ka diiwaan-gashan Somaliland goobta uu doono ha joogo ee sita calanka Somaliland.

**Qodobka 10aad wuxuu u dhignaa sidan:**– Waajibaadka

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland waxa uu si waafaqsan xeerarka dalka u gudanayaa waajibaadyadsiisa, kuwasaai oo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku xusan:

   b. In Xeerarka Soomaaliland lagu fuliyo gudaha biyo-badeedyada Somaliland.
   t. Fulinta xeerarka iyo xeer hoosaadyada khuseeya ilaalinta ama sharcinimada ka faa'iideysiga khayraadka iyo deegaanka baddaha Soomaaliland;
   j. Gudashada waajibaadyada ku cad Qodobka 8aad ee Xeerka La-dagaalanka Budhcad badeedka ee Soomaaliland, Xeer Lamb 52/2012;
   x. Ilaalinta amaanka gaadiidka maraya gudaha biyobadeedyada soomaaliland; iyo xaqiijinta in aan fal dambi badeed lagula kicin ama khatar amni darro oo kale la gaadh siinin noolaha iyo hantida iyo waliba hawlaha horumarineed, dayac tir iyo wax ka qabashada qalabka loo adeegsado bad marida;

   kh. ka hortagista in qof, qalab ama shaykale u soo galo ama uu uga baxo

gudaha Soomaaliland si aan sharci ahayn, ama iyadoon la bixinin khidmad, cashuur ama takaaliif kale oo sharci ah, ama iyadoon la fulin shuruud kale oo sharci waajibiyay;

d. Hawlaha baadhiseed iyo gurmad ee laga fulinayo dhulka, hawada iyo badda;
r. Baadhista gudaha xad baddeedka Soomaaliland laga baadhayo shil ama dhimasho ka dhacday badda ama hawada;
s. maareynta iyo suggidda ammaanka iyo badbaadada dakadaha;
sh. Yareynta ama ka hor tagista in Deegaanka ay soo gaadho wax yeello ba'an oo ka dhalata wasakhayn (spillage), shill, ku xad gudub xeer ama xeer hoosaad, ama khatar kale oo deegaaneed;
dh. xaqiijinta dhawrsanaanta khayraadka iyo deegaanka Badda;
c. in Wasaarada Kaluumaysiga iyo khayraadka badda Soomaaliland uu kala shaqeeyo ka hortagista iyo suulinta xad-gudubyo dhan ka ah Xeerarka iyo xeer hoosaadyada Kaluumaysiga; sida uu dhigayo qodobka 12aad ee xeerkani.
g. in wasaarada maaliyada iyo maamulka dekadaha uu kala shaqeeyo hirgalinata shuruucda maaaliyada iyo kastamada iyo amniga dekadaha dalka.
f. Fulinta hawl caam ah oo kale oo ay Wasiirka Arimaha Gudaha iyo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu ay u gartaan in Ciidanka Ilaalada Xeebuhu gudan karaan oo ay fulinta hawshaasina ay ku jirto dan qaran;
q. marka ay jirto xaalad dagaal ama xaalad deg-deg ah oo ay waajib ku tahay Ciidanka Ilaalada Xeebaha in uu ka qayb qaato difaaca Qaranka oo uu la shaqeeyo ciidamada Qalabka sida ee Qaranka ee hawshaasi ku foogan

**Qodobka 10aad waxa loo beddelay sidan:** – Waajibaadka Ciidanka Ilaalada Xeebaha:

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland waxa uu si waafaqsan xeerarka dalka u gudanayaa waajibaadyadsiisa, kuwasaai oo ay ka mid yihiin kuwan hoos ku xusan:

b. Ku fulinta Xeerarka Soomaaliland nidaamiyayaasha gudaha xad-badeedyada Somaliland.

t. Fulinta xeerarka iyo xeer hoosaadyada khuseeya ilaalinta nabadagelyada iyo bed-qabka khayraadka iyo deegaanka badaha Somaliland;
j. Gudashada waajibaadyada ku cad Qodobka 8aad ee Xeerka La-dagaalanka Budhcad badeedka ee Soomaaliland, Xeer Lamb 52/2012;
x. Ilaalinta amaanka gaadiidka maraya biyo-badeedyada soomaaliland; iyo ka hortaga fal-dembiyeedyada badeed, amani daranya iyo waxyeelaynta noolayaasha.

Kh. ka hortagista in qof, qalab ama shaykale u soo galo ama uu uga baxo gudaha Soomaaliland si aan sharci ahayn, ama iyadoon la bixinin khidmad, cashuur ama takaaliif kale oo sharci ah, ama iyadoon la fulin shuruud kale oo sharci waajibiyay ilaalinta;

d. U gurmashada shilalka ka dhaca gudaha xad bedeedka dalka iyo baadhistooda. Baadhista gudaha xad baddeedka Soomaaliland laga baadhayo shil ama dhimasho ka dhacday badda ama hawada iyo baadi-goobka iyo badbaadinta dadka iyo weel-badeedyada ku wax-yeelooba.
r. Hawshii Booliska iyo faraca badda.
s. Yareynta ama ka hor tagista in Deegaanka ay soo gaadho wax yeello ba'an oo ka dhalata wasakhayn (spillage), shill, ku xad gudub xeer ama xeer hoosaad, ama khatar kale oo deegaaneed;

Sh. xaqiijinta dhawrsanaanta khayraadka iyo deegaanka Badda;

Dh. Ka kaamaynta Wasaarada Kaluumaysiga iyo khayraadka badda Somaliland shaqeeyo ka hortagista iyo suulinta xad-gudubyada ka dhan ka ah Xeerarka iyo xeer nidaamiyayaasha Kaluumaysiga; sida uu dhigayo qodobka 12aad ee xeerkani.

c. Kala shaqaynta Wasaarada maaliyada iyo maamulka dekadaha uu kala shaqeeyo qabashada weel-badeedyada ku gefa shuruucda maaaliyada iyo kastamada iyo amniga dekadaha dalka.
g. Fulinta hawlaha danta guud ee kale ee ay Wasiirka iyo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu ay u gartaan in Ciidanka Ilaalada Xeebaha ay ugu muuqato in ay ku jirto dan qaran.

f. Marka ay jirto xaalad dagaal ama xaalad deg-deg ah waxa waajib ku ah Ciidanka Ilaalada Xeebaha in uu ka qayb qaato difaaca Qaranka oo uu la shaqeeyo Ciidamada Qalabka Sida ee Qaranka ee hawshaasi ku foogan

**Qodobka 11aad wuxuu u dhignaa sidan:-** Awoodaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Awoodaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa ay gaadhsiisan tahay xudduud badeedyada Jamhuuriyada Somaliland, si waafaqsan Xeerkan, Xeerka Ciqaabta Guud, Habka Xeerka Ciqaabta iyo Xeerarka kale ee badda ee ay ka mid yihiin xeerka kalluumaysiga, xeerarka maaliyada iyo dhamaan xeerarka kale ee khuseeya, isaga oo kala shaqaynaya hay'adaha kale ee Qaranka.

2. Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa uu yeelanayaa awoodahan soo socda

   b. In uu qabto, ka hotago, isla markaana baadho dhammaan faldambiyeedyada ka dhaca xuduudaha badaha somaliland.
   t. in uu xidho, hayo, wax su'aalo oo uu wareysto dadka lagu tuhmo in ay faldambiyeedyo galeen;
   j. in uu ururiyo caddeymo iyo wareysiyada laga qaaday ama ay bixiyaan dadka la xidhay ee ku kujira gacantooda iyo markhaatiyadaba; isla markaana horgeeyo maxkamada sharciga u leh si waafaqsan xeerarka dalka.
   x. in uu joojiyo oo baadhis ku sameeyo gaaddidka badda;

   kh. in uu Qabto walxaha iyo hantida khuseeya fal dambiyeedyo la galey (dhacay);

   d. in uu dambi baadhis ku sameeyo dhacdooyinka dambiyada;
   r. in uu wax su'aalo oo uu waraysto dadka eedaysanayaasha ah ama xidhan ama la hayo ee gacantooda ku jira;

   s. In uu ka hortagto in xad biyoodka Soomallailnd lagu soo galo sifo aan waafaqsanayn sharciga ama xadgudub ku ah shuruucda caalamiga ah ama xeerarka Qaranka.

3. Ciidanka Ilaalada Xeebahu waa in uu u fuliyo awoodahiisaas si waafaqsan Dastuurka Soomaaliland iyo Shuruucda kale ee ay tahay in la dabaqo.

**Qodobka 11aad waxa loo beddelay sidan:-** Awoodaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Awoodaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa ay gaadhsiisan tahay xudduud badeedyada Jamhuuriyada Somaliland, si waafaqsan Xeerkan, iyo Xeerarka kale ee badda ee ay ka mid yihiin xeerka kalluumaysiga, xeerarka maaliyada iyo

dhamaan xeerarka kale ee khuseeya, isaga oo kala shaqaynaya hay'adaha kale ee Qaranka.

2. Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa uu yeelanayaa awoodahan soo socda

   b. In uu joojiyo , ka hortago, isla markaana baadho gaadiidka badda ee sabab fiican (good reason) loo hayo inay gacanta kula jiraan fal-dambiyeedyada iyagoo ku sugan gudaha xuduudaha badaha somaliland.
   t. in uu xidho, hayo, wax su'aalo oo uu wareysto dadka lagu tuhmo in ay faldambiyeedyo galeen;
   j. in uu ururiyo caddeymo iyo wareysiyada laga qaaday ama ay bixiyaan dadka la xidhay ee ku ku jira gacantooda iyo markhaatiyadaba; isla markaana ku wareejiyo xeer-ilaalinta Qaranka u leh si dawladdu ugu oogto si waafaqsan xeerarka dalka.
   x. in uu joojiyo oo baadhis ku sameeyo gaaddidka badda;

   kh. in uu Qabto walxaha iyo hantida khuseeya fal-dembiyeedyo la galey (dhacay);

   d. in uu dembi baadhis ku sameeyo dhacdooyinka dambiyada;
   r. in uu wax su'aalo oo uu waraysto dadka eedaysanayaasha ah ama xidhan ama la hayo ee gacantooda ku jira.
   s. In uu ka hortagto in xad biyoodka Soomallailnd lagu soo galo sifo aan waafaqsanayn sharciga ama xadgudub ku ah shuruucda caalamiga ah ama xeerarka Qaranka.

   Sh. Ciidanka Ilaalada Xeebahu waa in uu u fuliyo awoodahiisaas si waafaqsan

   Dastuurka Soomaaliland iyo Shuruucda kale ee ay tahay in la dabaqo.

**Qodobka 12aad wuxuu u dhignaa sidan:-** Wadashaqaynta Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu wadashaqayn dhaw la yeelanayaa Wasaaradda Kaluumaysiga.

2. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu kala shaqaynayaa Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda:

   a) Ka hortaga kaluumaysiga sharci darrada ah;

   b) Ilaalinta kaluumaysatada ku kaluumaysanaya ruqsad sharci ah oo Wasaaradda Kaluumaysigu bixisay;

c) Ilaalinta iyo ka hortaga waxyeelaynta xeebaha Somaliland iyo khayraadka ku duugan;

d) Soo qabashada, haynta iyo sharci horgaynta doonyaha iyo shaqaalaha saaran ee ku xadgudba sharciga kaluumaysiga Somaliland;

e) Ilaalinta Xarumaha Wasaaradda Kaluumaysiga ee xeebaha ku yaal iyo hantida dhextaalba;

f) Hubinta iyo xaqiijinta ansaxnimaa ruqsadaha kaluumaysi ee doonyaha iyo maraakiibta badda Somaliland ku jirraa wataan;

g) Hubinta aqoonsiga doonyaha iyo maraakiibta ka kaluumaysanaya badda Somaliland;

h) Ka hortaga washakhaynta badda.

3. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu fulinta waajibaadyadan kor ku xusan uga amar qaadanayaa Madaxda Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda.

4. Taliyeyaasha Ciidanka Ilaalada Xeebaha ee gobolada iyo degmooyinka dalku waxa ay si buuxda ugala shaqaynayaan arrimaha Kaluumaysiga iyo waajibadyadda ku xusan faqrooyinka qodobka Isuduweyaasha Wasaaradda Kaluumaysiga.

**Qodobka 12[aad] waxa loo beddelay sidan:-** Wadashaqaynta Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka Badda

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu wadashaqayn dhaw la yeelanayaa Wasaaradda Kaluumaysiga.

2. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu kala shaqaynayaa Wasaaradda Kalluumaysiga iyo Khayraadka badda:

a) Ka hortaga kaluumaysiga sharci darrada ah;
b) Ilaalinta kalluumaysatada ku kalluumaysanaya ruqsad sharci ah oo Wasaaradda Kalluumaysigu bixisay;
c) Ilaalinta iyo ka hortaga waxyeelaynta xeebaha Somaliland iyo khayraadka ku duugan;
d) Soo qabashada, baadhista dembiyada ka dhaca biyo-badeedka Somaliland iyo ku wareejinta kiisaska doonyaha iyo shaqaalaha saaran ee ku-xadgudka xeerarka kalluumaysiga Somaliland;

e) Ilaalinta Xarumaha Kalluumaysiga ee xeebaha aan boolisku joogin ku yaal iyo hantida dhextaalba;
f) Hubinta iyo xaqiijinta sharcinimada ruqsadaha kalluumaysi ee doonyaha iyo maraakiibta badda Somaliland ku jirraa wataan;
g) Hubinta aqoonsiga doonyaha iyo maraakiibta ka kaluumaysanaya badda Somaliland;
h) Ka hortagga washakhaynta badda.

3. Taliska kala heerka ah Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa ay fulinta waajibaadyadan kor ku xusan uga amar qaadanayaan Madaxda Wasaaradda ee kala heerka ah.

4. Taliyeyaasha Ciidanka Ilaalada Xeebaha ee gobollada iyo degmooyinka dalku waxa ay si buuxda ugala shaqaynayaan arrimaha Kaluumaysiga iyo waajibadyadda ku xusan farqadaha qodobkan Isuduweyaasha Wasaaradda iaygoo taliskooda guud ee si deg deg ah arrimaha ugu wergelinayaan.

Qodobka 13aad wuxuu ka dhigay qodobka 15aad qodobka 14aad wuxuu ka dhigay 16aad qodobka 15aad wuxuu ka dhigay 17aad qodobka 16aad wuxuu ka dhigay 18ad.

**Qodobka 14aad wuxuu u dhignaa sidan:** Awoodaha iyo doorka Madaxweynaha

Madaxweynuhu waxa uu ku leeyahay Ciidanka Ilaalada Xeebaha awoodaha ku xusan Qodobka 90aad Faqraddisa (4aad) ee Dastuurka, waxa uuna:

a. Isagoo ka duulaya talo bixinta Wasiirka Arimaha Gudaha, magacaabaa shaqadan ka eryaa Taliyaha iyo ku xigeenka Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

b. Si sharciga waafaqsan u bixiyaa darajooyin, abaal marin iyo bilado ay mutaystaan Saraakiisha Ciidanka Ilaalada xeebuhu;

c. Fuliyaa hawlaha iyo waajibaadyada kale ee xeerkan ama xeer kale u awood siiyey.

**Qodobka 14aad waxa loo beddelay sidan:** Awoodaha iyo doorka Madaxweynaha

Madaxweynuhu waxa uu ku leeyahay Ciidanka Ilaalada Xeebaha awoodaha ku xusan Qodobka 90aad Faqraddisa (4aad) ee Dastuurka, waxa uuna:

d. Isagoo ka duulaya talo bixinta Wasiirka Arimaha Gudaha, magacaabaa, xilkana ka qaadaa Taliyaha iyo taliye ku xigeenka Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

e. Si sharciga waafaqsan u bixiyaa darajooyin, abaal marin iyo bilado ay mutaystaan Saraakiisha Ciidanka Ilaalada xeebuhu;

f. Fuliyaa hawlaha iyo waajibaadyada kale ee xeerkan ama xeer kale u awood siiyey

**Qodobka 16[aad] wuxuu u dhignaa sidan:** Qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa qaab dhismeedkan soo socda:

    a) taliska guud eee ka kooban taliyaha iyo taliyexigeenka ciidanka ilaalada xeebaha.

    b) Waaxda/Hogaanka Baadhista Danbiyadda Badda

    c) Waaxda/Hogaanka Hirgalinta Shuruucda Badda iyo la shaqaynta hay'adaha kale ee qaranka.

    d) waaxda/Hogaanka isgaadhsiinta iyo Mushaaxidda Badda

    e) Hogaanka Farsamada iyo Taakulaynta

2. Ciidanku Ilaalada Xeebuhu waxa kale oo uu yeelan karaa Waaxyo kale oo ku haboon shaqadooda.

3. Shaqooyinka Waaxyaha kala duwan ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa nidaamin doona xeer hoosaad ay soo saarto Wasaaradda Arrimaha Guduhu.

**Qodobka 16[aad] wuxuu u beddelay sidan:** Qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha

1. Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa qaab dhismeedkan soo socda:
    a) Taliska guud oo ka kooban Taliyaha iyo Taliye Xigeenka Ciidanka Ilaalada Xeebaha.
    b) Waaxda Baadhista Dembiyadda Badda
    c) Waaxda Hirgelinta Shuruucda Badda iyo la shaqaynta hay'adaha kale ee qaranka;
    d) Waaxda isgaadhsiinta iyo Mushaaxidda Badda;
    e) Waaxda Farsamada iyo Taakulaynta
2. Ciidanku Ilaalada Xeebuhu waxa kale oo uu yeelan karaa Waaxyo kale oo ku haboon shaqadooda.
3. Shaqooyinka Waaxyaha kala duwan ee Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa nidaamin doona xeer nidaamiyayaasha xeerkan ka dheegan.

**Qodobka 17aad wuxuu u dhignaa sidan:** Qaabdhismeedka Darajada Ciidanka Ilaalada Xeebaha

Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa darajooyinka soo socda:

1. Saraakiil sare
    a. Admiral/ Sareeye guuto
    b. Gaashaanle Sare
    c. Gaashaanle dhexe
    d. Gaashaanle
2. **Saraakiil Hoose**
    a. Dhamme
    b. Laba xiddigle
    c. Xiddigle
3. **Saraakiil xigeeno**
    a. saddex xadhigle
    b. laba xadhigle
    c. xadhigle
4. **Askari**
    a. Saddex Alifle
    b. laba alifle
    c. Alifle

**Qodobka 17aad wuxuu u beddelay sidan:** Qaabdhismeedka Darajada Ciidanka Ilaalada Xeebaha

Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu yeelanayaa darajooyinka soo socda:

1. Saraakiil sare
    a) Admiral/ Sareeye guuto

b) Gaashaanle Sare
c) Gaashaanle dhexe
d) Gaashaanle

2. **Saraakiil Hoose**
   a) Dhamme
   b) Laba xiddigle
   c) Xiddigle

3. **Saraakiil xigeeno**

   a) saddex xadhigle
   b) laba xadhigle
   c) xadhigle

4. **Askari**
   a) Saddex Alifle
   b) laba alifle
   c) Alifle
   d) Dable
   e) Dable dhiman.

**Qodobka 18aad wuxuu u dhignaa sidan:**Taliyaha Ciidanka Ilaalada xeebaha

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa hogaaminaya Taliye
2. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxa uu yeelanayaa darajada iyo mushaar la mid ah ka darajada adhmiraal/guuto.
3. Taliyuha waxa, si waafaqsan Qodobka 90aad farqadiisa 4aad ee Dastuurka, u magacaabaya Madaxweynaha oo ka duulaya aqoonta iyo waayo aragnimada cidda la magcaabayo iyo talo bixinta Wasiirka Arimaha Gudaha;
4. Qofka loo magacaabayo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa in uu buuxiyo shuruudahan soo socda:

   a. In uu ka mid yahay saraakiisha sare ee Ciidanka Ilaalada xeebta; iyo

   b. In uu haysto diploma uu ka qaatey Kulayadda Culuunta Badda

5. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu leeyahay waajibaadyadan soo socda:

   a. In uu dabaqo Dastuurka iyo sharciga;

b. Hagaa, isku duba ridaa oo uu kormeeraa dhammaanba hawlaha Ciidanka Ilaalda Xeebta;

c. Waxa uu meel mariyaa siyaasadaha qorsheyaasha, iyo xeer hoosaadyada khuseeya amaanka badda, iyo wareegtooyinka ay soo saaraan Wasiirka Arimaha Gudaha iyo Madaxweynuhu ;

d. Waxa uu warbixino ka siiyaa Madaxweynaha iyo Wasiirka Arimaha Gudaha hawlaha iyo wax qabadka Ciidanka Ilaalada Xeebta;

e. Waxa uu diyaariyaa warbixin lix biloodle ah oo khusaysa hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha oo loo gudbunayo wasiirka Arimaha Gudaha; sidoo kalena waxa uu diyaarinayaa warbixin sannadle ah madaxweynaha loo bandhigo oo khusaysa wax qabadka Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

f. Waxa uu xidhiidhiyaa oo kala shaqeeyaa hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha hay'adaha iyo wakaaladaha ee ay hawl wadaaga iyo wadashaqaynta leeyihiin;

g. waxa uu masuulka yahay tayeynta iyo horumarinta Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

h. waxa uu diyaariyaa sannad miisaaniyadeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha, una gudbiyaa Wasiirka Arimaha Gudaha oo uu sidoo kalena warbixin saddex biloodle ah ka diyaa riyaa isticmaalka miisaaniyadda siiyaana Wasiirka Arimaha Gudaha;

i. Waxa kale oo uu fulinayaa hawlaha kale ee sharcigu u igmado.

6. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu leeyahay awoodahan soo socda:

a. Waxa uu soo jeediyaa una gudbiyaa Madaxweynaha si uu u ansixiyo dalacsiinta iyo derejo dhimista Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

b. Waxa uu soo jeediyaa dib u eegis lagu sameeyo Qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha una bandhigaa Wasiirka Arimaha Gudaha si uu ansixiyo;

c. Isagoo ka duulaya Qaab dhismeedka an saxan, ayuu ansixiyaa shaqaaleynta xubno cusub ee looqorayo Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

d. Waxa uu galayaa heshiisyo waafaqsan xilka/ awoodda Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo sifaha uu qeexayo sharcigu;

e. Waxa uu soo saaraa awaamiir maamul iyo hab raacyo ( standard operating procedures) ku aadan hawl gudashada iyo qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha .

**Qodobka 18aad wuxuu u beddelay sidan:** Taliyaha Ciidanka Ilaalada xeebaha

1. Ciidanka Ilaalada Xeebaha waxa hoggaaminaya Taliye
2. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu waxa uu yeelanayaa darajada iyo mushaar la mid ah ka darajada adhmiraal/guuto.
3. Taliyuha waxa, si waafaqsan Qodobka 90aad farqadiisa 4aad ee Dastuurka, u magacaabaya Madaxweynaha oo ka duulaya aqoonta iyo waayo aragnimada cidda la magcaabayo iyo talo bixinta Wasiirka Arimaha Gudaha;
4. Qofka loo magacaabayo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waa in uu buuxiyo shuruudahan soo socda:
   a) In uu ka mid yahay saraakiisha sare ee Ciidanka Ilaalada xeebta; iyo
   b) In uu haysto degree ama kuulliyada hoggaaminta, ama degree ama diploma kuulliyad abbaanduule uu ka qaatey degree hoosayn Kullayadda Culuun Bad.
5. Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu leeyahay waajibaadyadan soo socda:
   a) In uu dabbaqo Dastuurka iyo sharciga;
   b) In uu Hago, isku dubba rido oo uu kormeero dhammaanba hawlaha Ciidanka Ilaalda Xeebta;
   c) In uu meel mariyo xeererka, siyaasadaha iyo qorsheyaasha, xeer nidaamada khuseeya ammaanka badda, iyo wareegtooyinka ay soo saaraan Wasiirka iyo Madaxweynuhu ;
   d) Waxa uu warbixino ka siiyaa Madaxweynaha iyo Wasiirka Arimaha Gudaha hawlaha iyo wax qabadka Ciidanka Ilaalada Xeebta;
   e) Waxa uu diyaariyaa warbixin lix biloodle ah oo khusaysa hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha oo loo gudbunayo wasiirka Arimaha Gudaha; sidoo kalena waxa uu diyaarinayaa warbixin sannadle ah madaxweynaha loo bandhigo oo khusaysa wax qabadka Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

f) Waxa uu xidhiidhiyaa oo kala shaqeeyaa hawlaha Ciidanka Ilaalada Xeebaha hay'adaha iyo wakaaladaha ee ay hawl wadaaga iyo wadashaqaynta leeyihiin;

g) waxa uu masuulka yahay tayeynta iyo horumarinta Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

h) waxa uu diyaariyaa sannad miisaaniyadeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha, una gudbiyaa Wasiirka Arimaha Gudaha oo uu sidoo kalena warbixin saddex biloodle ah ka diyaa riyaa isticmaalka miisaaniyadda siiyaana Wasiirka Arimaha Gudaha;

i) Waxa kale oo uu fulinayaa hawlaha kale ee sharcigu u igmado.

j) Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa uu leeyahay awoodahan soo socda:

6. Waxa uu soo jeediyaa una gudbiyaa Madaxweynaha si uu u ansixiyo dalacsiinta iyo derejo dhimista Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

7. Waxa uu soo jeediyaa dib u eegis lagu sameeyo Qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha una bandhigaa Wasiirka Arimaha Gudaha si uu ansixiyo;

8. Isagoo ka duulaya Qaab dhismeedka an saxan, ayuu ansixiyaa shaqaaleynta xubno cusub ee looqorayo Ciidanka Ilaalada Xeebaha;

9. Waxa uu galayaa heshiisyo waafaqsan xilka/ awoodda Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo sifaha uu qeexayo sharcigu;

10. Waxa uu soo saaraa awaamiir maamul iyo hab raacyo ( standard operating procedures) ku aadan hawl gudashada iyo qaab dhismeedka Ciidanka Ilaalada Xeebaha .

**Md Maxamuud Axmed Obsiiye: -** Gudoomiyaha, xildhibaanada sharafta leh dhamaa waan idin salaamayaa, run ahaantii xildhibaankii iga horeeyay ayaa ku dheeraaday oo waxyaabo badan oo aan sheegi lahaana sheegay, laakiin anigu waxaan is dul taagayaa dhawr ariood oo mida koobaad ay tahay Biyo Badeedka oo laba qaybood u qaynsama biyo caalamiya iyo biyo goboleed iyo biyo caalamiya, labadaa biyood oo ay tahay in dawlad kasta oo leh xeeb ama bad ay waajib ku tahay sida ay sheegayaan xeerarka caalamiga ah iyo kan Somalilandba, hadii aad eegto biyo badeedka u dhexeeya Cadan iyo Somaliland oo la yidhaa Arabian Calf hadii aad u fiirsato labadaa waxaa la isku yidhaa biyo goboleed, hadana marka aad dhinaca kale ka eeto waxaa laga dhigay marin caalamiya.

Hadii intaa aan kaga gudbo biyaha waxaan gudo galayaa qodobada uu adeegsaday xeerkani ee uu yidha markuu arkay **qodobada 38, 74 (1) 76, 77, 78 iyo 124 (1)** ee dastuurka jamhuuriyda Somaliland. Qodobkaa 74aad waxaa weeyi soo bandhigida xeerka iyo meesha uu soo marayo runtii waxaanan soo jeedinayaa in ay ku cadaato xeerarku meesha ay soo marayaan. Waxa uu jidaynayaa Dastuurkeenu in ay sadex moolood ay soo maraan xeerarku in ay Xukumadu soo curiso, in golayaasha sharci dajintu sameeyaan iyo in shan ku oo qof keenaan, markaa halkan kuma cada ee waa in lagu cadeeyaa meesha uu xeerkani ka yimi.

Qodobka kale ee uu adeegsaday xeerkani waa qodobka 124aad ee isna sheegaya qaabka ciidamada oo uu leeyahay ciidamadu waa sadex ciidan oo kaliya oo kala ah ciidanka xooga dalka, ciidanka bilayska iyo ciidan asluubta, markaa sadexdaa ciidan wax aan ahayn laguma magacaabi karo ciidan. Waa in uu raacaa bilayska ama ciidanka milatariga, hadii aad eegto caalamiga waxay raacaan ciidanka bilayska, sida xeerkan ku qeexana waxaa la leeyahay wasiirka daakhliga ayaa qaabilsan. Bilayska iyo laanta socdaalku waxay hoosyimaadaan wasaarada arimaha gudaha, markaa sida uu xeerku jidaynayo in loogu yeedho ciidan madax banaan ma haboona, sababta oo sadexdaa uu dastuurku sheegayo ayuunbaa madaxbanaan.

Marka aad eegto xeerka magiciisa iyo u jeedooyinkiisa waxaad arkaysaa in ay ku qorantahay safxada koobaad ee hor dhaca waxaa uu golaha wakiiladu soo saarayaa xeerka ilaalada xeebaha jamhuuriyada Somaliland, taasi waa sax lakiin wuu iska hor imanayaa oo marka danbe waxa uu leeyahay Xeerkan waxa lagu magacaabi doonaa Xeerka Ciidanka Ilaalada Xeebaha Soomaliland, waxaana ay sax ku tahay ilaalada xeebaha ee maaha in la yidhaa ciidan ee waa in ay noqotaa Hay'ad hoostimaada Booliska oo hadii loo baahdo qaab ciidan iyo darajooyinba ha yeelato, laakiin waa in aan la odhan ciidan, waana mid hoosyimaada booliska ama hoos yimaada ciidanka qaranka Qaranka. Hadii uu noqodo milatarina waa lagu magacaabi karaa ciidan oo waxaa la odhanayaa ciidanka bada, lama odhanayo Ilaalada Xeebaha oo cida xeebaha ilaalinaysaa waa booliska oo hadii aad eegto wadamada carabta waxaa la yidhaa booliska ilaalada xeebaha.

Markaa anigu waxaan soo jeedinayaa in dib loogu noqdo arimaha aan soo jeediyay oo ay ka mid tahay in magaca xeerka la badalo, in sidoo kale la badalo u jeedooyinka xeerka si ay u waafaqaan ilaalada xeebaha ee aanay ciidankii qaab dhismeedkiisa iyo hawlihiisa aanay soo galin. Waana in meel kasta oo ay ciidan ku qarantahay loo badelaa Hay'ad maadaamo oo aynu leenahay Sadex ciidan oo kaliya.

Hadaan tusaale ahaan u soo qaadano Qodobka 10aad ee u jeedooyinka xarafkiisa "L" in wasaarada maaliyada iyo maamulka dekadaha uu kala shaqeeyo hirgalinata shuruucda

maaaliyada iyo kastamada iyo amniga dekadaha dalka." Marka aad eegto farqadan oo kale wixii maaliyad ku saabsan waxay leeyihiin ciidamo gaar ah oo qaabilsan sidii cashuuraha loo qaadi lahaa iyo ka hortaga cida bixin weyda cashura sidii loo soo qabanlahaa.

Fulinta hawl caam ah oo kale oo ay Wasiirka Arimaha Gudaha iyo Taliyaha Ciidanka Ilaalada Xeebahu ay u gartaan in Ciidanka Ilaalada Xeebuhu gudan karaan oo ay fulinta hawshaasina ay ku jirto dan qaran; halkaa waxaan odhan lahaa maadaama oo aan idhi ha hoos yimaadaan cidanka booliska waa in halkaa lagu badelaa taliyaha ciidanka booliska.

Marka aan sii eegno qodobka 11aad farqadiisa labaad waxaan ku dari lahaa marka hawlaha uu qodobkaasi sheegayo oo dhan la qabto waa in xeer-ilaalinta loo gudbiyaa si ay waajibaadkooda uga gutaan, waayo halkan waxaa ku qoran way xidhi kararaan 24sacadood sida ku qoran Dastuurka, intaa wixii ka badan waa in maxkamad la geeyaa iyo xeer-ilaalin la soo mariyaa si aan looga gudbin xaqa uu leeyahay mu waadinka iyo qofka shisheeyaba waxaan ku soo ururinayaa waa in la kala saaraa oo aan la odhan ciidan Ilaalo xeebeed si aanu ugu hor iman Dastuurka iyo Xeerarka kale, sidoo kalana waxaan soo jeedinayaa in la yidhaa Hay'ada Ilaalada Xeebaha.

**Cabdiraxmaan Yuusuf Cartan:-** Gudoomiyaha, xildhibaanada sharafta leh waad salaamantihiin, xeerkan xildhibaanadii iga horeeyay mulaaxadaadkii ay sameeyeen waan ku raacsanahay qaar ka mid ah, xeerkan sidii xildhibaankii iga horeeyay sheegay waxaa guriyay Golaha wakiilada in kastoo qodobkaa 38aad uu ka hadlayo xeer dajintu ay ka mid noqon karaan ku dajinaya xeerarka, xeerkana waa xeer technical ah, waana xeer ciidan waxay ila tahay in ay ka timaado kuwa ku shaqada leh, in kastoo wixii inaga qabyo ah la keeni karo mushkilada malaha, waxaanse jeclaan lahaa ama ay ku haboontahay in xaga hordhaca ay nu ku muujino maxaynu uga baahanahay ciidan? Ama Hay'ad sida la sheegay ilaalada Xeebaha oo mabaadiidu mid walba way ka maqantahay xeerarkeena, maxaynu ugha baahanay in aan samaysano ciidan? Wey cadahay laakiin waan in ku qeexnaato Document-keena, oo tusaale ahaan marka uu leeyahay baahida loo qabo Xeerka ilaada Xeebaha, waa in lagu muujiyaa badeenu inta ay leegtahay Bari iyo Galbeed.

Inagu Somaliland ahaan waxaynu ku jirnaa gacanka cadmeen, marka loo eego wadamada aynu jaarka nahay iyada oo dhinaca kale laga eegayo 12 mayl ee sharciga ahaa inaga oo meelaha qaarna yeelanayna 45-50 mayl intaas oo bad ah ayaa loo baahanyaha wixii ilaalinlahaa hadii ay noqon lahay Daryeelka Khayraadaka Dabiiciga ee ku duucan iyo in laga ilaaliyo wixii tagri fal ah ee lagu samaynayo, markaa waxaan

jelaan lahaa in halkaa hor dhaca aynu u samayno sababta aynu xeerkan ugu baahanahay iyo dayaca ka jira badeena taa waan soo jeedin lahaa.

Sidii horaba loo soo jeediyay waxaan leeyahay in xeerku uu yahay mid kooban in laga daayo Qaybaha ayaan ku raacsanahay oo xeerka toos loo wado qodobadiisa, waxaa kale oo dhawr jeer ku soo noqnoqonaya qaab dhismeedka oo kale, waxaa kale oo ka buuxa qadalaad badan una baahan in dib loo saxo, una badan xaga afsoomaaliga waxaanan soo jeedin lahaa in qoladaa wax garaacaysaa ay nadiifiyaan.

**Qodobka 4aad. Baaxada Xeerka**

"*Xeerkan waxa lagu dabaqayaa danbiyadda kala duwan ee ka dhaca xuduud biyoodka(bada) Somaliland*" halkaa waxaan jecelahay in la taabto ayaan soo jeedin lahaa oo ay ka mid tahay ka hortaga budhcad badeeda, ka hortaga fayo-dhawrka biyaha, ka hortaga wasakhaynta bada, kaluunka sharci darada ah, iyo habsami u socodka dhaqdhaqaaqa habsami u socodka ganacsiga xorta ah, waa in too loo cadeeyaa waxa uu ka hortagayo ayaa muhiim ah in la sheego.

Sida aan horeba u soo sheegay waxaa ku jira hadolo dheeraad ah una baahan in la soo koob-koobo, halkan waxaa la socda Document ay soo qoreen gudidu ay kusaxayaan xeerka oo aan waafaqsanayn xeerka qodobadiisa oo ay is dhaafsan yihiin ayaa jira, tusaale ahaa qodobka 12aad oo ka hadlaya dirayska ciidanka waxa uu xeerka ha hadlayaa *Wadashaqaynta Ciidanka Ilaalada xeebaha iyo Wasaaradda Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda* markaa isku mid ma aha ee waa in la saxaa. Isla qodobka 13aad ee xeerka iyo lifaaquna isma waafaqsana ee waa in la is waafajiyaa, hadii aan akhriyo sidii ay gudidu u soo gudbisay waxaa ku qoran xubinta ka midka ee isaga oo gudanaya waajibaadkiisa ciidan ama lagu dilo aar goosi waajibaadkiisa isaga oo gudanaya waxaa magtiisa bixinaya dawlada. Dadku miyaanay muwaadiniin ahayn, goorma ayay dawladi ciidan keeda bixisaa mag? Taasina waxay ila tahay mid aan Meesha qaban waayo dawladu sida ay hawleheeda iyo ciidankeeda u maamulayso iyadaa garanaysa, waana in hadalkaa Meesha laga saaro.

Qaybta 4aad qodobka 14aad awoodaha iyo doorka madaxweynaha oo ah wixii uu dastuurku ka qorayay aniga waxay ila tahay in uu qodobkaasi Meesha soo galo ilama aha, sababta oo ah madaxweynaha iyo qaybka mid ah ciidanku maaha in ay Meesha soo galaan, waana in Meesha laga saaraa ayaan soo jeedinayaa.

Waxaa kale oo ku qoran xeerka laba arimood oo kala ah in uu wasiirka arimaha guduhu uu ka warbixinayo ciidanka ilaada xeebaha, sidoo kalana waxaa ku qoran taliyaha ayaa warbixin siinaya madaxweynaha, markaa halkaa procedure ahaan qalad ayaa ku jira, waa in uu taliyuhu wasiirka uu siiyaa warbixinta waayo isaga ayuu hoosyimaadaa.

**Qodobka 22: Shuruudaha Guud ee looga baahanyahay Saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebaha**

Shuruudaha looga baahanyhay saraakiisha Ciidanka Ilaalada Xeebuhu waxa ka mid ah,:

a. In uu yahay muwaadin Soomaliland u dhashay;

b. In uu dhamaystey aqoonta dugsiga dhexe;

c. In caafimaadkiisa jidheed ama maskaxeedba wanaagsan yahiin;

d. In aan horey loogu xukumin dambi

e. In uu leeyahay habdhaqan wanaagsan

Waxaan u dhigi lahaa sidan: -

Qodobka 22: shuuadaha xulashada saraakiiha, saraakiil xigeenka iyo askarta ciidanka Ilaalada Xeebaha

a. Saraakiisha
   1. Qofka sarkaal loo qaadanayaa waa inuu haysto ugu yaraan derejada kowaad ee shahaadad jaamacadda ama kuliyadaha farsamada
   2. Waxaa laga qaadayaa imtixaan aqoonta guud, xisaabta iyo juqraafiga
   3. Tabaraidda saraakiisha, aqoon ku saabsan nabadgelyada badda
   4. Siinta casharo ku saabsan dabbaasha
   5. Marka ardaygii ka soo qalin jabiyey jaamacaddu dhammaysto tababr lix bilood ah wuxu qaadanayaa hal xiddig
b. Xulashada sarkaal xigeenka
   1. Qof ka soo baxay dugisga sare
   2. Imtixaan aqoonta guud
   3. Tababar saddex bilood oo ku saabsan aqoonta badda
   4. Ku tababaraidda dabbaasha iyo aqoonta badda
   4. Derejada hal xadhig baa lagu qaadanayaa saddexda bilood ka dib

c. Qaadashada Askariga (Dable)
   1. Inuu yaqaan akhriska iyo qorista Af Soomaaliga
   2. Tababar saddex bilood oo ku saabsan dabbaasha iyo aqoonta badda

**Md. Maxamed Xuseen X. Ciise: -** Xeerkan Ciidanka Illaalada Xeebaha Somaliland Runtii waxaan la waafaqsanahay qaybo badan oo xildhibaanadii iga horeeyay soo jeediyeen sida Xuseen Caydiid oo mooday isagu inuu khibrad badan u leeyahay, halkan waxaan ku hayaa laba nuqul oo kala ah Warbixintii Gudidda Arrimaha Gudaha ee Xeerkan iyo Xeerkii laftiisa.

Marka hore waxaan ka hadlayaa qaybta Gudidda, Gudiddu dhowr qodob bay soo qaadeen **Qodobka 9aad** waan ku waafaqsanahay siday u soo dhigeen Gudiddu oo waxba kaga noqon maayo, **Qodobka 11aad** Gudiddu waxay ku soo dartay Farqad cusub waxaana qabaa in farqadaasi wax saasa aanay soo kordhinayn maadama farqada 1aad ee Xeerku sheegayso waxyaabay farqada cusub ka hadlayso markaa waxaan soo jeedinayaa in sidii hore Qodobkaas lagu daayo.

Labada Qodob ee Gudiddu ku soo dartay ee ay ka dhigeen **Qodobka 12aad iyo Qodobka 13aad** waxaan odhan lahaa ha waxaa muhiima in Cutubyada iyo Qodobku qaab-dhisme ahaan is yeeshaan oo qodobkasta cutubka ku haboon ha laga dhigo, sidaa darteed anigoo eegaya labadan qodob cutubyaday ku haboon yihiin waxaan soo jeedinayaa in ***Qodobka 12aad*** ee Gudiddu ku soo dartay Xeerka laga dhigo ***Qodobka 18aad*** oo cutubkaas ayuu qaadanayaaye, halka ***Qodobka 13aad*** isaga waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo ***Qodobka 29aad*** oo cutubkaas ayuu ku haboon yahay oo ka hadlaya waxa qodobkaasi ka hadlayee.

**Qodobka 14aad** oo Gudiddu ka saartay **farqadaha 3aad iyo 4aad**, waxa weeye anigu waxaan leeyahay ***farqada 3aad*** kuma raacina in laga saaro ha la isku soo ururiyo uun, laakiin ***farqada 4aad*** ha laga saaro waan ku waafaqsanahay, **Qodobka 19aad, Qodobka 24aad, Qodobka 27aad iyo Qodobka 29aad** waan ku raacsanahay Gudidda Qodobadaas, intaasi waa wax ka badalkii Gudidda.

Qaybtan kale ee Xeerka Gudihiisa **Qodobka 2aad** ee Eray Bixinta intii uu soo jeediyay Xuseen Caydiid baan ku raacsanahay Erayga "Ciidanka Illaalada Xeebaha" waa la laba qoray markaa waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"CIIDANKA"** ***Waxaa loola Jeedaa Ciidanka Illaalada Xeebaha.***

**Qodobka 3aad** ee Ujeedadda Xeerka Qoraalka Qodobkan marka la akhriyo ma biyo dhacsana markaa Waxaan jeedinayaa in sidan loo dhigo: -

**"Ujeedadda Xeerka Waa in la dhiso Nidaam Ciidan la isku halayn karo oo Xaqiijinaya in Ciidanku u guto waajibaadkiisa si waafaqsan Shuruucda dalka, Shuruucda Badaha iyo Amaanka xad badeedka iyo badwaynta caalamiga ah**" oo intaas uun loo daayo ayaan soo jeedinayaa, labadan farqadood uu la sii raaciyay waxaa cadaynaya Qodobka 5aad si aanay ku laba celin u noqon ha laga saaro ayaan iyana soo jeedinayaa.

**Qodobka 7aad** ee Astaanta Ciidanka Illaalada Xeebaha **Farqada 3aad** si khaldan bay u qoran tahay marka waxaan soo jeeinayaa in laga dhigo **"Ciddina ma adeegsan karto astaanta Ciidanka Illaalada Xeebaha, ciddii adeegsatana waxay mutaysanaysaa Ciqaab waafaqsan Xeerka Ciidamada".**

**Qodobka 8aad Farqada 1aad** Iyana qoraalkeeda ayaan soo jeedinayaa in dib loo habeeyo waxaana ka dhigi lahaa **"Ciidanka Illaalada Xeebuhu waa inuu yeesho rugo Ilaalo oo**

**ku teedsan Xeebaha Somaliland"** sidoo kale **Farqada 3aad** waxaan ku sii daray farqadan halka ugu dambeysa kaga sii daray **"oo xeerkan ka farcamay".**

Xeerkan waxaad moodaa in la sameeyay intii ka horeysay Xukuumadan labaad ee Kulmiye waayo waatan Wasaaradihii la isku dardaray oo Wasaaradii Kaluumaysiga la baa'biyay oo waxaa ku qoran Wasaarada Kaluumaysiga, waxaana soo jeedinayaa in lala akhriyo Xeerkii aynu ka doodnay Kaluumaysiga waayo laba qodob oo Xeerkan ah ayaa sheegaya Wasaarad Kaluumaysi iyo Khayaraadka Badda ah, marka waxay noqon doonta in lala akhriyo Xeerkaas oo sidii aynu ka dhignay la yidhaahdo Wasaarada qaabilsan Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda.

**Qodobka 11aad** oo Gudiddu ka hadleen **Farqadiisa 1aad** waxaan odhan lahaa ha la soo kobo oo ha laga dhigo sidan **"awoodaha Ciidanka Illaalada Xeebuhu waxay gaadhsiisan tahay Xuduud badeedyada Somaliland si Waafqsan Xeerkan iyo Xeerarka kale ee Dalka"** intaas ha lagu soo koobo oo ha laga saaro Xeerarkan kale uu magac-dhabay ee badan.

**Qodobka 12aad** waa sidaan Sheegay oo wuxuu ka hadlayaa wada shaqaynta Ciidanka iyo Wasaarada Kaluumaysiga iyo Khayraadka Badda markaa waxaan odhan lahaa ha lala akhriyo Xeerkii Kaluumaysiga aynu ka doodaynay maalintii dhowayd, Qodobkuna wuxuu ka kooban yahay 4 farqadood oo labada farqadood ee **3aad iyo 4aad** way isku macne guud ahaan nuxurkooduna wuu isku dhowyahay, anigu waan isku daray oo waxaan ka dhigay farqad kaliya oo u dhigan sidan **"Ciidanka Illaalada Xeebuhu wuxuu fulinta Waajibaadyada kor ku xusan kala shaqaynayaa Madaxda Wasaarada qaabilsan Kaluumeysiga iyo Khayraadka Badda ee Heer Qaran iyo Heer Gobol"** farqada 4aad ha laga saaro ayaan leeyahay.

**Qodobka 14aad Farqada 4aad** uun baan ku raacsanahay in laga saaro Gudidda. **Qodobka 16aad** ee Qaab-dhismeedka Ciidanka oo ah 3 farqadooda ah waxaan soo jeedinayaa in lagu daro **Waaxda Tababarada** oo inta badan ciidamadu ay leeyihiin meelo badan oo tababarada ka hadlayaa jira hadana way ka tageen waaxdaas markaa ha lagu daro **Farqad-hoosaad "F"** ah oo laga dhigo **Waaxda Tababarada ah.**

**Qodobka 19aad** ee Ku-xigeenka Taliyaha Ciidanka isaga waxaad moodaa inay ka maqan tahay shuruudihiisa Waxbarashada sida taliyaha halkan loogu cadeeyo halkan looguma cadayn isagana markaa waxaan soo jeedinayaa in lagu cadeeyo heerka aqoontiisa waxbarasho.

**Qodobka 20aad** ee shaqo ka saarista/eryida taliyaha **Farqada 2aad** waa in loo eego kala saraynta Ciidanka sida farqadu u qoran tahay waa khalad waa in la sheega sida ciidanku u kala sareeyo si loogu sii dhiibo Taliye ku-xigeenka inta laga soo magacaabayo Taliye.

**Qodobka 26[aad]** oo ka hadlaya nidaamka anshax marineed waxaad moodaa marka sidan la leeyahay Xeer Ciidan in aan loo dhigin Xeerka oo markii la diyaarinayay loogu talagalay xeer shicib marka xeer ciidan looguma talagalin marka sidan la leeyahay oo sida Ciidamada Qaranka iyo Booliiska iyo Asluubta oo kale maaha sidan oo waxaad moodaa in sidii Ciidan Madani ah ay ka dhigayaan waana meelaha loo baahan yahay Somaliland in laga taxadaro maadaama ay Xeebo leedahay waa in Ciidan asal ah yeelata oo Ciidanka Badda la yidhaahdo, Marka Farqada 4aad halka ***loogana rafcaan qaadan karo maxkamadda awoodda garsoor u leh*** waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo **"loogana rafcaan karo Maxkamada Ciidan ee awoodda u leh**" madaama ay Ciidan yihiin. Intaas ayaan ku koobayaa.

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil: -** Dastuurku Saddex Ciidan buu ogolyahay Gudoomiye kuwaas oo kala ah Ciidanka Militaryga, Ciidanka Booliiska iyo Ciidanka Asluubta, anigu waxaan leeyahay maadaama ciidan afraad oo dastuurka ka horimanaya aanay suuragal ahayn in laga dhigo Illaalada Xeebaha (Coastal Guard) ayaan anigu aaminsahay ama ha noqdan qayb Booliiska ka mid ah oo Waax ah laakiin Ciidan afraad meelna kama soo galo sharciga.

Ciidankan Illaalada Xeebaha in badan cabashadooda dhagaysanay Wasaarada Kaluumaysiga oo waxay aaminsan yihiin in kala qaybsanaanta Ciidanka iyo Wasaaradu ay keentay oo aan meel laga wada xukumayn, waxayna ku doodayeen Wasaaradii Kaluumaysiga hore iyo kuwan iminkuba in Nimankan Ciidanka haysta ay Wakiil iyagu ka yihiin Maraakiibta iyo Doonyaha nagama amar qaataan, markaan Wasiirka Arrimaha Gudaha barino markuu doono war naga taga ayuu yidhaahdaa, Marka Waxaan aaminsanahay in la hoos geeyo Wasaarada Kaluumaysiga si ay u qabsadaan shaqadii loogu talagalay ama Ciidanka Qaranka ha tirsanadaana oo Ciidanka Xooga Dalka ha ka mid noqdan, fikirkayga Waxaan soo jeedinayaa In Wasaarada Kaluumaysiga la hoos geeyo.

**Md. Maxamuud Dhunkaal Guutaale: - ugu horeyn Qodobka 1[aad]** ee Magca Xeerka ee Xeerka Ciidanka Illaalada Xeebaha dee waajibkoodu maaha xeeb kaliya, anigu waan ka badali lahaa oo waxaan odhan lahaa Xeerka Ciidanka Badda, waayo hadii laga dhigo sidan Illaada Xeebaha dee Xeebta uun bay ilaalinayaa markaa Ciidanka Badda ayaan soo jeedinayaa, meel kasta oo ku taalo Xeerka Illaaladda Xeebahana waxaan ku badalayaa Xeerka Ciidanka Badda.

Laba Wasaaradood buu Ciidankani ka dhexeeyaa oo Wasaarad line Minister buu u yahay oo Wasaarada Arrimaha Gudaha, Wasaaradan Kaluumaysiga iyo Xanaanada Xoolaha oo hadeer Wasaarad isku noqdayna wada shaqayn bay la yeelanayaan, Ciidankuna maaha mid shuruucda ku cad dastuurkuna saddex ciidan buu sheegay kuu yahay lama sheegin,

farac mid saddexda Ciidan ka mid ahna lama odhan, markaa waxaan leeyahay madaama aanu ciidan dastuuri aanu ahayn waa in la waafajiyaa shuruucda oo uu Booliiska farac ka mid ah sida Ciidanka Nabadgalyada Waddooyinka, RRUda iyo CIDda oo kale uu noqdaa si uu Sharciga u waafaqo Dastuurkeenu wuxuu qorayaa Xeerkasta oo ka horimanaya Dastuurka waa waxba kama jiraan, markaa Xeerarka inaga baxaya shuruucda ha la waafajiyo ayaan leeyahay.

**"Xad baddeed"** Waxaa loola jeedaa Xuduudaha biyaha badda 12 myl badeed aaga ku xiga xad baddeedka iyo aaga khayraadka badda Somaliland, xad badeed waxaan filayaa xadka baddeena iyo dalalka inala jaarka nahay, markaan ka dhigi lahaa Xad baddeed Waxaa loola Jeedda xadka Badda ee ay waddaagaan Somaliland iyo Dalalka aynu jaarka nahay.

**"Awoodda sharciyeed** "Waxaa loola jeeda Xadbadeedka kowaad ee ay gaadho awooda fulineed ee Qaranka Somaliland, awoodda sharciyeed ba lagu qoray waxaana jira Xeerar caalamiya oo baddaha khuseeya.

**Qodobka 3aad** ee Ujeedadda Xeerka waxaan ku darayaa **Nidaam ciidan baddeed** oo soo jeedinayaa "**Ujeeddada Xeerku waa in la dhiso Nidaam Ciidan baddeed oo la isku halayn karo oo xaqiijinaya in si waafaqsan Shuruucda dalka, kana horimanayn shuruucda baddaha iyo Amaanka xad badaha iyo badwaynta caalamiga ah".**

**Qaybtaa 2aad** Asaassaadka Ciidanka badda waxaan soo jeedinayaa "Xeerkan Waxaa loo assaasay Ciidanka badda Somaliland, taliska Ciidanka badda waxa weeye Hargeysa iyo Xarumo Gobolada badda iyo rugo ka sii farcamaya xarumaha Gobolada" sida Xarumaha kale ee ciidamada oo Hargeysa ah isla markaana uu wasaarad hoos imanayo Hargeysa laga dhiga xarunta, xarumaha Gobolada ee Dalkeena saddex Gobol baa xeeb leh Sanaag, Saaxil iyo Awdal markaa gobolkiiba xarun ay ka sii farcamaan rugo ayuu yeelanayaa.

**Qaybta 3aad** hawlaha iyo Waajibaadka Ciidanka Badda, hawlaha ciidanka xeerkii aynu maantii dhowayd ka doodaynay ee Kaluumaysiga iyo xeerkan hadii midba aynu awood ku siino way iskhilaafayaan, markaa waa inaynu isla akhrinaa oo midaynaa hawlahaas.

**Cawad Cali Maxamed** — **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**

**C/risaaq Siciid Ayaanle** — **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**

------------------------------------------------ ----------------------------------------